

Qiimaha Doolarka Oo Sayladaha Sarrifka Ee Dunida Gaadhay Halkii Ugu Hoosaysay

Muddo 24 Sano Ah

Sunday, 22 March 2009

(Geeska/Aljazeera) - Qiimaha doolarka ayaa si lama filaan ah u maalintii shalay Sayladaha sarrifka lacagaha ee dunida ka gaadhay halkii ugu hoosaysay ee uu gaadho muddo 24 sano ah. Sida ay sheegayaan wararka suuqyada sarrifku, qiimaha doolarka ayaa muddo toddobaad ahba hoos u socday isla markaana illaa hadda ma muuqdo rajo tilmaamaysa in uu Doolarku ka soo kaban doono qiimo jabka ku dhacay.

Qiimo dhaca ku yimi doolarka Maraykanka ayey khubarada dhaqaalaha adduunku ku sheegeen in ay tahay tii ugu darnayd ee ku timaadda laga soo bilaabo sannadkii 1985-kii, isla markaana lagu wado in qiimo dhacaasi hoos u sii socdo muddooyinka dhow, sidoo kale waxa shalay suuqyada dunida laga dareemay qiimo dhac kale oo ku yimi shidaalka dunida, shidaalka oo qiimihisu muddooyinkanba hoos u socda ayaa la sheegay in mar labaad uu jimcihii hoos u dhacay kadib markii lagu kala iibsaday foosta 35 doolar oo keliya. Qiimo jabka ballaadhan ee ku yimi wax yaabaha muhiimka ah ee dunida oo sababtiisu tahay dhaqaale xumada dunidu waxa uu saameyey qiimaha dahabka adduunka oo la sheegay in wiqiyaddii ay ka dhacday lacag ku dhow laba doolar iyo badh.

In kasta oo uu qiimaha dollarku hoos uga dhacay suuqyada adduunka, haddana waxa maalmihii ugu dambeeyay kor u kacay suuqyada sarifka ee Somaliland qiimaha dollarka, taas oo keentay in ay sare u kacaan qiimaha maciishadda daruuriga ah. Illaa iyo haddana lama garanayo sababta keentay in iyadoo uu qiimaha dollarku adduunka hoos uga dhacay uu suuqyada Somaliland cirka isku sii shareero.

Source: www.geeska.net, Wargeyska Geeska Afrika, Hargeysa